Baaritaan lagu ogaanayo covid-19 (fayruska corona) ka jira Göteborg

Waxaa halkaan lagugu waydiisanayaa ka waalid ahaan (qofka ilmaha ka mas´uulka ah) haddii aad rabtid in ilmahaagu ka qaybqaato baaritaan ku saabsan covid-19 ka jira Göteborg. Baaritaanka waxaa fulinaya Västra Götalandsregionen iyo Sahlgrenska Universitetssjukhuset.

Ujeedada baaritaanka laga leeyahay waa in la ogaado inta ay le´egyihiin qaybaha shacabka ka mid ah oo da´o kala duwan leh ee wakhti xaadirkaan uu hayo covid-19. Waxay muhiim u tahay in la qorsheeyo daryeelka caafimaadka iyo shaqada ka hortagga faafitaanka cudurka.

Si taas loo sameeyo waxaa la waydiinayaa 17000 qof oo ku nool shan degmo waaxeed oo Göteborg ku yaal oo si **bakhtiyaa nasiib** ah looga soo xulay diiwaanka dadwaynaha. Waxaa sidoo kale lagu waydiisanayaa inaad ka qaybqaadatid maadaama ilmahaagu ka mid yahay dadka bakhtiyaa nasiibka lagu soo xulay. Ka qaybqaadashadu iyo baaritaanku waa bilaash. Xittaa haddii ilmahaagu caafimaadkiisu taam yahay oo uusan lahayn wax astaan cudur ah waxaan doonaynaa inuu ka qaybgalo baaritaanka.

Haddii ilmahaagu ka qaybqaadanayo waa in qalabka tijaabada lagu qaado ee la socda tijaabada lasoo diray **tijaabo uga soo qaadid dalqada , sanka iyo candhuuf**. Tijaabada waa in guriga lagu qaado oo kaddibna loo celiyo mid ka mid ah goobaha loo asteeyay in loo celiyo **maalintii la rabo (inta u dhexaysa) 29 juun- 3 juulay** sida ku qoran bogga soo socda (ama mararka qaarkood guriga lagaga soo doono).

Waxaad ogaan doontaa **natiijada** kasoo baxda baaritaanka asbuuc gudihiis qaadidda tijaabada kaddib. Haddii tijaabada laga helo fayruska corona markaas waxay u badan tahay in ilmahaaga weli hayo covid-19. Tijaabadu waxay tilmaamaysaa haddii caabuq ku hayo wakhtigaan la joogo oo ma tilmaamayso in cudurku kugu soo dhacay ama jirkaagu diffaac ka samaystay.

Baaritaanka kaddib tijaabada waa la **keydinayaa** si hadhow loogu isticmaalo dhammaystirka baaritaannada si horumar loogu sameeyo daryeelka iyo cudur baarista.

Warbixinta ku saabsan ilmahaaga (da´da, jinsiga, cinwaanka) iyo natiijada tijaabada waxaa loo maaraynayaa si aysan cid aan loo oggolayn aysan heli karin. Maaraynta **xogta shaqsigaa** waxaa loo marayaa sida aw dhigayo **qaraarka ilaalinta xogta ee Midowga yurub (EU).** Haddii aad rabtid in lagu la wadaago waxa lagaa diiwaangeliyay ama aad wax saxdid waxaad la xiriiri kartaa Wakiilka ilaalinta xogta, Isbitaalka Sahlgrenska Universitetssjukhuset, Röda stråket 8, 413 45 Göteborg, tel: 031-3432715, e-mail: sahlgrenska.universitetssjukhuset.dso@vgregion.se.

Wixii warbixin intaa dheer oo ku saabsan baaritaanka waxay ku jirtaa https://www.vgregion.se/covidgbg. Warbixin **luuqado kale** ku qoran baa sidoo kale ku jirta https://www.vgregion.se/covidtesting. Baaritaanka oo dhan natiijadiisa waxaa lagu soo bandhigayaa Hey´adda ka hortagga cudurrada faafa ee gobolka Västra Göteland (Smittskydd Västra Götalands) boggeeda. Hela undersökningens resultat kommer att presenteras på Smittskydd Västra Götalands hemsida.

Haddii aad **su´aalo** ka qabtid baaritaanka ama tijaabada la qaadayo waxaan kaa codsanaynaa inaad marka koowaad email u dirtid covidundersokning@vgregion.se. Haddii aadan email u diri karin ama aad u baahan tahay warbixin intaa dheer waxaad wici kartaa 010-4739450 maalmaha shaqada saacadaha 8.00-18.00.

Maamulaha hawsha, dhakhtar sare
Xanuunada Caabuqa

Dadka ka mas´uulka ah baaritaanka
Lars-Magnus Andersson

VÄSTRA GÖTALANDSREGIONEN

Isbitaallada Sahlgrenska
Universitetssjukhuset/Östra

Magnus Lindh
Maamulaha laanta, dhakhtar sare,
borofaysar
Klinisk Mikrobiologi
Sahlgrenska Universitetssjukhuset

Leif Dotevall
Wakiilka dhakhtarka u xilsaaran ka
hortagga xanuunada faafa
Västra Götalandsregionen

Jan Kilhamn
FoU-chef
Västra Götalandsregionen

VÄSTRA
GÖTALANDSREGIONEN

Sidaan baad samaynasaa si aad uga qaybqaadatid baaritaanka
Haddii ilmahaagu leeyahay waalid kale waa inaad isku raacsan tihiin in ilmuhu ka qaybqaato baaritaanka. Haddii aad tijaabada keentid waxaad caddaynasaa in labada waalidba ay oggolaansho bixiyeen.
1. Waxaad tijaabada u qaadaysaa sida laguu tilmaamay isla maalinta aad rabtid inaad celisid.
2. Aqoonsiga ilmahaaga iyo lambarka tijaabada waa in la diiwaangeliyo. Sidaan baa loo samaynayaa:

- Waalidiinta leh BankID waxaa laga codsanayaa inay iyagu iskood uga diiwaangeliyaan ilmaha direkttest.se oo raacaan tilmaanta. Waxay ku fiican tahay in BankID la **isku diiwaangeliyo** waa in markaas natiijada dhaqso loo helayo iyadoo la isku soo ogaysiinayo farriin telefoonka lagu soo dirayo oo lagu galo BankID.

- Waalidiinta aan haysan BankID waa in qaab kale loo diiwaangeliyo. Waxaa marka koowaad laga codsanayaa inay xogtaan soo socota email ugu soo diraan covidundersokning@vgregion.se :
    - Lambarka aqoonsiga tijaabada (toban lambar)
    - Magaca qofka tijaabada laga qaadayo
    - Lambarka aqoonsiga shaqsigaa (tobanka lambar)
    - Taariikhda tijaabada la qaadayo
    - Telefoon lambarka aan soo wici karno haddii loo baahdo.
- Dadka aan email soo diri karin ama sabab kale awgeed caawinaad ugu baahan diiwaangelinta waxaa laga codsanayaa inay soo wacaan 010-4739450 (maalmaha shaqada saacadaha 8.00-18.00)

3. Tijaabada waxaa **loo celinayaa** mid ka mid ah goobaha hoos ku qoran maalintii la doono inta u dhexasa 29 juun – juulay inta u dhexaysa saacadaha 08:00-18:00. Tilmaanta jidka waxay ku jirtaa https://www.vgregion.se/covidgbg.

1. Bergsjöskolan, Rymdtorget 6, Göteborg
2. Garoonka isboortiga wareegsan ee Biskopsgården ku yaal (u dhexeeya Klimatgatan iyo Daggdropsgatan)
3. Hvitfeldtska gymnasiet, Rektorsgatan 2, Göteborg
4. Kärralundsskolan, Birkagatan 61, Göteborg
5. Sannaskolan, Jordhyttegatan 5, Göteborg

Waa muhiim inaan la isku ciriirin meesha tijaabada lagu qaadayo oo waxaan sidaas darteed kaa codsanaynaa inaad raacdid tilmaanta shaqaalaha ku sugan goobta tijaabada lagu qaadayo. Si looga hortago is ciriirin waa muhiim ah inaad tijaabadaada soo diiwaangelisay (sida ku cad qodobka 2 ee kore).

Baaritaankaan waxaa nagu gacan siiyay Xoogga dalka (Försvarsmakten) oo waxay ku sugan yihiin goobta lagu uruurinayo tijaabooyinka iyagoo ku labisan dharka ciidanka.

Haddii aad **ka wayn tahay 70 sano ama aadan dareemayn in caafimaadkaagu taam yahay** maalinta aad tijaabada reebaysid waxaa muhiim ah in aadan imaan goobta loo celinayo tijaabada. Waxaan taas beddelkeeda kaa codsanaynaa inuu ku caawiyo qof kaa wakiil ah oo tijaabadaada kaa geeyo.

Haddii uusan jirin qof kugu caawin kara inuu kaa geeyo tijaabada waa inaad la xiriirtid covidundersokning@vgregion.se ama wacdid 010-4739450 maalmaha shaqada saacadaha 8.00-18.00 oo sheegtid magaca, lambarka aqoonsiga shaqsigaa iyo telefoon lambarka markaas waxaan kuu habayn doonnaa in tijaabada guriga lagaga soo doono.

Haddii aadan rabin inaad ka qaybqaadatid baaritaanka waad inaad nala soo xiriirtid**.**

Waad ku mahadsan tahay wakhtiga aad gelisay akhrinta arrintaan.

Covid-19

Tijaabo iska qaad

Akhri oo dulmar tilmaanta oo dhan inta aadan bilaabin

Iska hubi inaad haysatid waxaad u baahan tahay inta aadan bilaabin

- Bac weyn oo wax lagu xafido oo aabur jinyeer ah leh:
  - Qori tijaabada lagu qaado oo baakad u gaar ah ku jira.
  - Dhalo tijaabada lagu qaado oo fur leh, warqad calaamad ah ku dheggan tahay iyo cusbo karsan oo qasan.
  - Bac yar oo aabur jinyeer ah leh, warqad calaamad ah ku dheggan tahay iyo xaanshi lagu ilaalinayo tijaabada inta lasii safrinayo.
- Hal saxan ama koob.
- Bac lagu guro qashinka iyo jab xaanshiyaha guriga lagu isticmaalo.

U diyaargarowga tijaabada

1. Fur bacda wayn oo soo bixi waxa ku guda jira. Waxaad soo saari kartaa miiska hortaada yaal.
2. Fur bacda yar oo u daa warqadda lagu tirtirto ha ku dhex jirtee.
3. Soo saar dhalada tijaabada lagu qaado oo dulsaar warqadda xaanshida guriga lagu isticmaalo.
4. Soo saar baakadka uu ku jiro qoriga tijaabada lagu qaado.
5. Kasoo saar qoriga tijaabada lagu qaado baakadka. Meel dhigo baakadka si aad qoriga dib ugu celisid markii aad dhamaysid.

Diiwaangeli tijaabadaada

1. Toos u aad **direkttest.se** ee telefoonkaaga gacanta ama kombuyutarkaaga ku jira, dooro ”Registrera prov”.

ELLER

Ku sawir (iskaan garee) lambarka QR-koden ee ku dheggan dhalada tijaabada lagu qaado ama bacda adigoo kaamirada telefoonkaaga gacanta ku aadinaya lambarka QR-koden.

2. Ku buuxi xogtaada oo raac tillaabooyinka oo dhan.
3. Markii aad aqoonsigaaga ku caddaysid BankID- diiwangelintu way dhammaatay. Waxaa laguu email uu ku qoran yahay lambarka tixraaca loo soo dirayaa emailka aad qortay.

4.





Tijaabo laga soo qaadayo gidaarka



Tijaabo laga soo qaadayo sanka



Candhuuf ku tuf oo dhexgeli



Isku qas (walaaq)

Iska qaad tijaabo Ta prov på dig själv

1. Qoriga qaybtiisa jilicsan afka gasho oo cunaha kusii qaxee illaa cunaha meesha u danbaysa ee aad gaari kartid, illaa aad uga dhawaanaysid inaad matagtid.
2. Kusoo xoq qoriga darbiga dalqada (meesha cunaha ugu danbaysa) intii aad awoodid. Waad dhibsan doontaa, laakiin 5 ilbiriqsi ku filan. Arag sawirka.
3. Kaddibna si taxaddar leh dulka sanka u geli isla geeskii qoriga, gudaha usii geli intii aad awoodid. Kor ha u qalloocin qoriga. Qoriga kusoo xoq hareeraha 10–20 ilbiriqsi. Arag sawirka.
4. Candhuuf badan afka iskugu soo uruuri oo ku tuf saxanka ama koobka, iska ilaali xaako ama duuf inuu kaasoo raaco.
5. Qoriga qaybtiisa jilicsan dhex geli candhuufta si uu si fiican ugu qoyo.
6. U daa qorigu ha dhex yaalo saxanka ama koobka inta aad maaraynasid dhalada tijaabada lagu qaado.

Ku wareeji tijaabada dhalada tijaabada lagu qaado oo u baakadee dhalada tijaabada lagu qaado qaab la isku hubo

1. Fur aaburka dhalada tijaabada oo qoriga qaybtiisa jilicsan dhex geli dareeriga dhalada tijaabada salkeeda ku jira. Ku walaaq qoriga 20 ilbiriqsi.
2. Qoriga kasoo bixi dhalada tijaabada lagu qaado oo dhex geli baakadkiisii, ama ku celi gudaha saxanka ama koobka.
3. Ku wareeji aaburka oo si fiican u xir dhalada tijaabada lagu qaado.
4. Dhalada dhex dhig bacda yar ee daboolka jinyeerka ah leh, warqadda xaanshida iyo waraaqda calaamadda, si fiican u xir bacda yar.
5. Kaddib bacda yar ee ay ku jirta dhalada tijaabada lagu qaaday dhex dhig bacda wayn ee lagu xafidayo.
6. Si fiican u xir bacda.
7. Ku xafid bacda dhalada tijaabadu ku jirto tallaagad, illaa aad ka celinaysid ama lagaa soo doonayo. Waxaa fiican in tijaabada isla maalinta aad qaaday la celiyo.

U maaree qashinka qaab la isku hubo

1. Qoriga oo baakadkiisa ku jira iyo warqadda xaanshida ah ku rid bac caadi ah.
2. Si fiican afka uga xir oo u tuur sida qashinka guriga caadiga ah.
3. Saxanka iyo koobka waxaa loo dhaqi karaa si caadi ah.

Goormay jawaabtu diyaar tahay

Markii jawaabta tijaabadu ay diyaar noqoto waxaad heli doontaa farriin telefoonka ah. Waxay **caadiyan** diyaar noqotaa **72 saacadood** gudohood. Ku gal BankID bogga internetka direkttest.se si aad jawaabta u akhridid.

Haddii aadan lahayn BankID waxaad jawaabta ku helaysaa warqad boostada lagu soo diro. Haddii jawaabtu ay haa noqoto (positive) oo covid-19 lagaa helo waxaan kaala soo xiriiri doonnaa telefoon lambarka aad noo qortay.

Su´aalaha caadiga ah jawaabahoodu waxay ku **jiraan** https://www.vgregion.se/covidgbg**.**